Helping Hand™ *Health Education for Patients and Families*

# Qaniinyada Sannadlaha
# Animal Bites (Somali)

Xoqida xayawaanka ama qaniinyada waxay noqon kartaa cabsi badan. Canugaaga wuxuu u baahan karaa raaxo dheeraad ah iyo dareen dhoorka maalin ama isbuucyo si uu ku tago dhacdada.

## Gargaarka Koowaad ee Qaniinyada

- Ku dhaq qaniinyada oo dhan saabuun oo ku raaci biyo badan.
- Hel caawin caafimaad **isla maalinta haddii ay suurtogal tahay.** Tani **aad ayay muhiim u tahay!** Tolmooyinka (tolliinka) waa in lagu sameeyaa 12 saacadood gudahood qaniinyada kadib (Sawirka 1).
- Hubi taariiqda cirbada teetanada canugaaga ugu dambeyso.

***** Fiiro gaar: Carruurta waxaa laga yaabaa inay qaniinaan carruur kale. Qaniinyada aadanaha ayaa u baahan si la mid ah gargaarka koowaad iyo dareenka caafimaadka degdega sida qaniinyada xayawaanka.



**Sawirka 1** Hel dareenka caafimaadka **ee gudaha 12 saacadood.**

## Ku soo wargeli Waaxda Caafimaadka

Haddii qof uu qaniino xayawaan halkaan waa waxa aad u baahantahay inaad sameysid.

1. Gudaha 24 saacadood ee qaniinyada xayawaanka, ku soo wargeli Waaxda Caafimaadka ee caasimada ama gobolka halka qaniinyada ay ka dhacday. Wargelinta waxaa sameyn karo qofka la qaniinay, waalidka ama masuulka canug, bixiyaha daryeelka caafimaadka, ama dhaqtarka xoolaha ee wax ka yaqaana qaniinyada.


©1983, dib loo eegay 2022, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- Gudaha Gobolka Franklin soo wac (614) 525-3160
- Gudaha Columbus soo wac (614) 645-7288

2. Buuxi Wargelinta Qaadashada Qaniinyada Xayawaanka ee bogga 4. Weydii dhaqtarka canugaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka inuu **fakis** ugu diro Waaxda Caafimaadka ee caasimada ama gobolka halka qaniinyada ay ka dhacday.

## Maareynta Xayawaanka

- Haddii xayawaanka uu rabaayad yahay, isku day inaad heshid milkiilahiisa. Weydii haddii xayawaanka uu qaatay cirbadahiisa cudurka xayawaanka iyo taariiqda la sameeyay. Dhaqtarka ayaa u baahan inuu ogaado midaan si u qorsheeyo daaweynta canugaaga.
- Ka fogee xayawaanka dadka kale ee kula jiro aaga qaflan oo 10 maalmood oo ka fiiri isbadelo walba oo dabeecada ah. Ha isku dayin inaad qafis geliso xayawaan xanaaqsan ama xayawaan duureed. Haddii xayawaanka ku halis gelinayo, soo wac booliska ama xakameynta xayawaanka.
- Kibilaha – Haddii canugaaga ay qaniinto kibile, ama uu seexday qol ku jirto mid, waa **inay arkaan dhaqtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka.**

## Daryeelka Dhaawaca

Ka saar faashada maalin walba oo ku nadiifi dhaawaca saabuun iyo biyo. Kadib mari kareemka qalajiyaha oo saar faashad nadiif ah

## Astaamaha Caabuqa

Ka illaali aastaamaha caabuqa. Soo wac dhaqtarka canugaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ama booqo Waaxda Gurmadka kugu dhow haddii ay qabaan

- Qandho ka badan 102° Heerka (F) ama 38.8° Baaxada (C) oo futada (dabada) ama 101°F (38.3°C) oo afka (afka ah)
- Aastaanta (aastaamaha) caabuqa agagaarka dhaawaca:

| | |
|---|---|
| – Xanuunka ama urta xun | – Dhacaanka ama malacda |
| – Aaga aad u adagtahay | – Aaga gaduud ama barar tahay |

## Howsha

Canugaaga waa inuu ka fogaadaa howlaha adag sida dabaasha iyo ciyaaraha taabashada illaa dhaawaca ka bogsoodo. Kuwaan ayaa ku sababi karo dhaawaca inuu furo dib u celin

## Daawada

Canugaaga waxaa la siiyay tallaalada xiggo (cirbadaha):
______________________________________________________________________

Canugaaga wuxuu helay qoraalka dhaqtarka oo ______________daawada. U sheeg dhaqtarka canugaaga inay qaadanayaan daawadaan. Daawadaan waxaa loogu talo galay _____________.

## Sida looga Fogaado Qaniinyada

- **Haku qeylin ama haku ordin** agagaarka xayawaan.
- Cunto haku cunin markii xayawaan aadan garaneyn kuu dhowyahay.
- Hala dheelin ama ha qaban xayawaan duureed.
- Ha u dhawaan xayawaano koox ama xayawaanada aadan garaneyn.
- **Ka lugee** haddii xayawaanka korayo ama koro markii u dhawaatid. Ha ordin.
- Haddii lagu weeraro, sii jaakadaada, boorsada buuggaagta, ama wax walba oo aad dhigi kartid dhexda adiga iyo xayawaanka.
- **Ka fogow xiriirka indhaha** ee xayawaanka.
- **Si toosan u istaag** oo gacmaha dhinacyahaaga ah.
- Marnaba ha dhibin xayawaan isaga oo wax cunayo.
- Marnaba ha foorjeen ama ha ceyrsan xayawaan ama ha jiidin dhagahiisa, seentiisa, ama lugahiisa.
- Markii xayawaanka uu lumiyo xiisaha, si tartiib ah dib uga baxo illaadan markale ka arag.
- Haddii aad dhacdid, ku samey gacantaada balooni ka weyn dhagahaaga oo ha dhaqaaqain. Isku day inaadan qeylin ama aad dhinacyada u socotid.

**Haddii xayawaan yahay halis dhow ee dadka ama xayawaanada kale, u soo wac waaxda caafimaadka deegaanka wixii caawin ah.**

# WARGELINTA QAADASHADA QANIINYADA XAYAWAANKA

| | | | |
|---|---|---|---|
| Wadanka: | | | |
| Magaca Dhibanaha (Qofka Dhaawacmay) | | | |
| Ciwaanka | Caasimada | Gobolka | Furaha Zib-ka |
| Lambarka Taleefonka Guriga | Lambarka Taleefonka Shaqada | Lambarka Mobeelka | |
| Jinsiga<br>Lab Dheddig | Da'da | | |
| Waalidka/Masuulka (haddii dhibanaha uu ka yaryahay 18) | Ciwaanka Waalidka/Masuulka haddii ka duwanyahay: | | |
| Taariiqda Dhaawaca | Goobta Dhaawaca jirka | | |
| Goobta/Ciwaanka Dhacdada:<br>Ee Guriga Milkiilaha Xayawaanka Ka baxsan Guriga Milkiilaha Xayawaanka | | | |

## Warbixinta Xayawaanka

| | | |
|---|---|---|
| Nooca Xayawaanka<br>Eyga Mukulaasha Kibilaha Dabacadeeyaha Wax kale | | |
| Midibka/Aastaamaha Xayawaanka | Taranka | Magaca Xayawaanka |
| Goobta Xayawaanka Hadeer | | Magaca Xayawaanka lunsan<br>Haa Maya |
| Tallaalka Hadeer | Haddii ay Haa tahay, taariiqda tallaalada ama Lambarka Calaamada Cudurka xayawaanka | |
| Dhaqtarka xayawaanka (haddii la Garanayo) | | |

## Milkilaha ama Goobta Xayawaanka

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca Milkiilaha | | | |
| Ciwaanka | Caasimada | Gobolka | Furaha Zib-ka |
| Lambarka Taleefonka Guriga | Lambarka Taleefonka Shaqada | Lambarka Mobeelka | |

## WAXAA BUUXINAYO XARUNTA DAAWEYNEYSO

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca Xarunta: | Magaca Dhaqtarka xayawaanka: | | |
| Ciwaanka | Caasimada | Gobolka | Furaha Zib-ka |
| Lambarka Taleefonka | Daaweynta Gaarista Raabiyada La soo dhaafay waxay bilaabatay?<br>Haa Maya | | |

**Fakis u dir Gobolka ku haboon – Asal ISAGA ku socdo si loo sawiro jadwalka – U xaree Koobi diiwaanada qeybta**